



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

10 Shay oo La Xusuusinayo Qoysaska Dugsiyada Sarre Kuna Saabsan Waxbarashada Iskudhafan

Abril 14, 2021

Waxaanu ku faraxsanahay inaan soo dhaweyno ardaydeena dugsiyada sarre ee ku soo noqonaya dhismayaasha iskuuladeena bisha Abriil 19keeda. Maalintaasi waa maalin weyn in aan aragno ardaydii, aanu codadkoodii ka maqalno hoolasha iyada oo midba midka kale la kulmo. Dhowrkii todobaad ee u dambeeyey waxa aanu diyaarineynay sidii ay ardaydu ugu soo noqon lahaayeen iskuulada iyada oo aan idinla wadaageyno dhowr xusuusinoood haddii ay tahay ardayda iyo qoysaska.

1) Afarta W:

- a) Xiro waji saabkaaga (maaskarada)
- b) Dhaqo gacmahaaga
- c) Ilaali masaafada aad u jirto dadka kale
- d) Guriga iska joog haddii aad xanuunsan tahay

2) Fadlan Soo Qaado:

- a) Chromobook oo dabkiisu buuxo (xafiiska iskuulkaaga waxaa yaala dhowr xabo haddii ay ardaydu soo ilaawaan inay soo qaataan dab buuxiyahoodii)
- b) Caagad biyaha oo buuxda
- c) Maaskarada afka lagu daboolo (iskuulkaagu sidoo kale waa laga helayaa inay ku siiyaan haddii aad soo ilowdo)

3) Jadwalka:

- a) Iskuul kastaa waxa uu ku soo dhajiyey jadwalkiisa shabakada iskuulka. Cinwaanka shabakada (URLs) iskuulada waxaad ka heli kartaa [halkan](#), ama waxaad ku qortaa pps.net/schoolname (waxaad ku xijisaa magaca iskuulkaaga) halka laga galo cinwaanka shabakada.

4) Galitaanka Iskuulka:

- a) Ardaydu waxa ay soo gali dhismayaasha iskuulada saacadu marka ay tahay 1 p.m. Iskuul kastaa wuxuu yeelan doonaa dhowr iridood oo laga soo galo iyada oo ardayda la weydiisan doono inay raacaan calaamado gaar ah.
- b) Arday iskuulka yimid waqti hore waa inay galaan safka bannaanka dhismaha iyada oo ay ilaalinayaa sidii ay u kala fogaan lahaayeen waxaana lagu cadeeyey calaamado ku yaala dhulka.
- c) Fadlan ardayda hubi caafimaadkooda ka hor inta ayna iskuulka iman idinka oo

isticmaalaya tallaabooyinka hoos ku qoran ee ay tahay in la qaado. Ardayda ku jawaabo “haa” mid ka mid ah su’aalahani waa inay iska joogaan guryahooda, la tashadaan gargaar bixiyahooda dhinaca caafimaadka ka dibna ay la soo xiriiraan iskuulka.

- (1) [Daily Illness Self-Screening Checklist](#)
- (2) [Lista de autoevaluación diaria](#)
- (3) [Danh sách kiểm tra sàng lọc hàng ngày](#)
- (4) [每日疾病 自我筛查检查清单](#)
- (5) [Ежедневный самообследование](#)
- (6) [Hubiyaha baaridda xanuunka ee maalinlaha](#)

5) Marka Iskuulka Laga Baxayo:

- a) Ardayda waxaa iskuulada laga fasaxi saacadu marka ay tahay 3:45 p.m. maalin kasta. Ardayda waxaa looga baahan yahay inay ka baxaan irida ugu dhow, ka dibna ay tagaan guryahooda.
- b) Ardayda looma oggola inay saaxibadood dhismayaasha iskuulada la sii joogaan marka iskuulka la fasaxo.
- c) Haddii aad ardaygaaga aad ka qaadayso iskuulka, fadlan waxaad ku sugtaa bannaanka iskuulka.

6) Dib u eegista Nidaamyada Iskuulka :

- a) Waxaan u diyaariney ardayda iyo qoysaska inay dib u eegis ku sameeyaan [boorar yaryar casharo oo taxane](#). Boorarkan yaryar marka aad ka eegto dhinaca fariinta ay xambaarsan yihiin way fududahay laakiin waxa ay diirada saarayaan sawir dhab ka bixiyaan waxa dhabta ah ee ay qabanayaan iskuulada PPS, taasi oo ah sidii aan u gargaari lahayn ka hor inta ayna iman maalinta ugu horeysa ee waxbarashada iskudhafan.
- b) Dib u eegis lagu sameeyo fiidiyaal iyo nidaamyada [pps.net/reopen2021](#) oo ay ka mid yihiin [fiidiyaasheena gaarka ah ee dugsiyada sarre](#).
- c) Nidaamyada iskuulada qaarkood waxa ay noqon karaan kuwo ka duwan, sida loo marayo hoolasha, musqushee la isticmaalaa, iwm. Wax aanu dib u eegis ku sameyn doonaa nidaamyada inta lagu jiro maalmaha ugu horeeya ee fasalada waxbarashada la qaadanayo laakiin fadlan waxaad xusuusisaa ardaydiina inay waxyaabaha ay ku arki doonaan iskuuladoodi ay wax yar ka duwanaan doonaan sidii uu markii hore ahaa iskuulkoodu.

7) Foomka Oggolaanshaha Baaritaanka:

- a) PPS waxa ay codsanayaan oggolaanshaha qoysaska sidii ay uga baari lahaayeen ardayda xanuunka COVID-19 ka hor maalinta ugu horeysa ee waxbarashada iskudhafan. Waxaad ka heli kartaa nuqul Hay’ada Caafimaadka Oregon (OHA) oo laga helayaa foomka oggolaanshaha oo ku qoran luqadaha [Ingiriisi](#) iyo [Isbaanish](#).
- b) Marka aad buuxiso ka dibna saxeex, fadlan waxaad email ugu soo dirtaa xoghayaha iskuulka ardaygaaga. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaadkaasi [shabakada iskuulkaaga](#). Haddii aanad ku soo diri karin elektaroonig, waa soo daabici kartaa ka dibna waxaad soo gudbin kartaa nuqulkaasi oggolaanshaha foomka ardaygaaga xoghayahah iskuulka ama waxaad u soo dhiibi kartaa ardaygaaga marka uu imanayo maalinta ugu

horeysa ee waxbarashada iskudhafani ay bilaabmeyso.

- c) Marka la xaqiijiyo xanuunka COVID-19 ama la malaynayo, PPS waxa ay raaci doonaan Nidaamkayaga Loo Maro Xanuunka, kuwaasi oo aad ka heli karto marka aad [halkan gujiso](#).
- 8) Cuntooyinka:
- a) Ardayda ka qeybqaanaya waxbarashada iskudhafan waxa ay quraacadooda iyo qadadooda sii qaadan doonaan marka ay iskuulka ka baxayaan.
 - b) Maalmaha ayna qaadaneyn waxbarashada iskudhafaan ee iskuulka ka maqan yihiin, waxa ay cuntadooda ka qaadan karaan goob kasta oo ka mid ah [goobaha cuntada lagu qaybiyo](#).
- 9) Booqashada:
- a) Looma oggolaan doono waalidiinta iyo dadka iskuulka soo booqanaya. Fadlan waxaad isticmaashaan inaad nagula soo xiriirtaan dhinaca telefoonada iskuulada, iyo kulanada muuq baahiyaasha sidii la idinku xiri lahaa shaqaalaha iskuulka.
 - b) Fadlan waxaad ka fogaataa inaan ballan iskuulka ka qabsato iyo inaad codsato ardaygu ka yimaado iyada oo waxbarashada iskudhafan iskuulka ka socoto.
- 10) Tani waxa ay u tahay isbedel weyn oo farxadeed ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska. Waxa suurtagal ah inay ardaydu dareemayaan xamaasad, welwelsan yihiin, iyo dareen kale oo fara badan inay dareemayaan. Waxaanu qof kasta ka codsaneynaa sabarkooda iyo fahamkooda maadaama aan soo dhaweyneyno sidii qof kastaa ugu soo noqon lahaa iskuulada.